La xiriir: Katherine Fountain
Fountain.k@portseattle.org
206.787.3071

Wixii Shaacin degdeg ah la xariira
Maarso 9, 2026

# $2 Milyan ayaa diyaar u ah in lagu kordhiyo wacyigelinta shaqada iyo diyaargaroowga shaqada iyada oo loo marayo Sanduuqa Bulshooyinka ee South King iyo Dekadaha

*Codsiyada waxay furnaan doonaan ilaa bisha Abriil 20, 2026*

**SEATTLE –** Port of Seattle hadda waxay aqbalaysaa codsiyada ururada ku salaysan bulshada si loo kordhiyo muuqaalka shaqooyinka iyo shaqooyinka warshadaha la xiriira Dekadda ee bulshooyinka taariikh ahaan aan matalaad lahayn ee ku hareeraysan Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (Seattle-Tacoma International Airport, SEA) iyo Degmada South King, iyagoo gaaraya ilaa Beacon Hill iyo Dooxada Duwamish. Maalgelintu waxay taageertaa barnaamijyada ku xira dadka deegaanka shaqooyinka mushaaarka nolosha laga helo iyo waddooyinka shaqada ee dekada-la xiriira dekedaha ee duulista hawada, ganacsiga dhismaha, shaqooyinka cagaaran, iyo badda.

Qiyaastii $2 milyan ayaa laga heli karaa wareegga maalgelinta 2026 ee Sanduuqa Bulshooyinka South King iyo Dekedaha (oo hore u ahaan jiray Sanduuqa Saameynta Bulshada ee South King County) barnaamijka Fursadaha Dhaqaalaha ee Bulshooyinka (Economic Opportunities for Communities, EOC). Ururadu waxay codsan karaan ilaa $115,000 hal sano oo maalgelin ah iyo $100,000 ilaa $275,000 oo loogu talagalay maalgelin sanado badan ah (ilaa saddex sano). Muddada codsigu waxay furan tahay laga bilaabo Maarso 9, 2026 ilaa Abriil 20, 2026. Ururada bulshada ku salaysan ee leh 501(c)3, 501(c)6, ama kafaala-qaade maaliyadeed oo leh 501(c)3 ama 501(c)6 ayaa u qalma oo lagu dhiirrigelinayaa inay codsadaan.

“Barnaamijka EOC wuxuu ka tarjumayaa sida Guddiga uga go'an tahay inuu dhageysto bulshooyinka iyo inuu maalgeliyo xalalka ay gacan ka geystaan qaabaynta," **ayay tiri Guddoomiye Hamdi Mohamed**. "Annagoo taageereyna diyaarinta shaqada deegaanka hoggaaminaayo iyo tababarka shaqaalaha, waxaan ballaarinaynaa helitaanka shaqooyinka mushaarka nolosha laga helo iyadoo la sii wado ka shaqaynta xaafado xooggan oo adkeysi badan leh oo ku baahsan Koonfurta King County, Beacon Hill, iyo Dooxada Duwamish."

Barnaamijku waxaa markii koowaad lasoo saaray 2020 isagoo ah Barnaamijka Soo kabashada Dhaqaalaha, si looga jawaabo masiibada COVID-19, wuxuuna horumaray 2025 kadib markii la dhageystay kulano bulsho, jawaab celin la-hawlgalayaal, iyo falanqayn iyadoo la adeegsanayo Tusmada Sinnaanta Dekada. Barnaamijka EOC ee la cusbooneysiiyay wuxuu ka tarjumayaa isbadel laga sameeyay maalgashiyada diiradda saaraya soo kabashada una gudbay fursad dhaqaale oo muddo dheer ah iyo horumarinta shaqaalaha.

La xiriir: Katherine Fountain
Fountain.k@portseattle.org
206.787.3071

**Xidhiidhada warshadaha la xiriira dekedaha**
Iyada oo xiriir la leh dhammaan waaxyaha dhaqaalaha ee muhiimka ah ee Washington iyo xiriir lala leeyahay in ka badan 500 oo shirkado loo shaqeeya ah oo ka shaqeeya xarumaheeda, Dekadu waxay si gaar ah ugu habboon tahay inay abuurto waddooyin lagu gaaro shaqooyin mushahar wanaagsan leh oo ku saabsan duulista hawada, ganacsiga dhismaha, dhaqaalaha cagaaran, iyo warshadaha badda, kuwaas oo ka faa'iideysta bulshooyinka ay saameeyeen hawlgallada Dekedu. Maalgashiga horumarinta shaqaalaha ayaa muhiim ah maadaama warshado badan oo la xiriira dekedaha ay la kulmayaan shaqaale yaraan. Barnaamijyada diyaarinta shaqada ee ay bulshadu hormuudka ka tahay ayaa ka caawin doona ka qaybgalayaasha inay helaan soo-bandhigid, xirfado, waayo-aragnimo, iyo tababar loo baahan yahay si loo helo shaqooyin isku dhafan oo mushaar qoys ah oo sii kordhaya warshadahan.

"Iyada oo loo marayo taageerada iyo iskaashiga aan la leenahay Sanduuqa Bulshooyinka South King iyo Dekedda (SKPCF), waxaan awoodnaa inaan la kulanno dadka halka ay joogaan oo aan abuurno waddooyin macno leh oo aan ku galno shaqaalaha," ayay tiri Kathy Powers, Madaxweyne Ku xigeenka Adeegyada ee Orion Works. "Iskaashigaan wuxuu hubinayaa in shakhsiyaadka laga saaray suuqa shaqada ay heli karaan adeegyo xirfadeed oo dhammaystiran iyo tababar wax soo saar oo duulista hawada ah oo horseeda fursad dhab ah. Wadajir ahaan, dadka uma diyaarinayno shaqooyin oo keliya - waxaan ballaarinaynaa helitaanka sinnaan ee shaqooyinka mushaarka qoyska iyo xoojinta dhaqaalaha gobolka."

**Habraaca codsiga 2026**
Ururada xiiseynaya inay codsadaan maalgelinta waxaa lagu dhiirigelinayaa inay booqdaan [webseedka EOC] si ay:

- U buuxiyaan is-qiimaynta SKPCF EOC si loo go'aamiyo u-qalmitaanka iyo ku habboonaanta barnaamijka
- Booqo [VendorConnect] si aad u baarto oona usoo degsato codsiga
- Dib u eeg agabka codsiga, waqtiyada, iyo tusaalooyinka mashaariicda hore loo maalgeliyay
- Ka qaybgal kulan macluumaad oo soo socda oo ku saabsan RFP
- Soo gudbi codsi kahor bisha Abriil 20, 2026 si aad u hesho maalgelinta Fursadaha Dhaqaale ee Bulshooyinka
- Isku qor cusbooneysiinta iimaylka iyo ogeysiisyada maalgelinta mustaqbalka

**Xog ku saabsan Sanduuqa Bulshooyinka South King iyo Dekedaha (South King and Port Communities Fund, SKPCF)**
Dekadu waxay abuurtay [Sanduuqa Saameynta Bulshada Degmada South King] (oo hadda ah Sanduuqa Bulshada ee South King iyo Port) sannadkii 2019 si loo horumariyo iskaashiyo ku salaysan sinnaanta iyo in la siiyo ilo iyo taageero bulshooyinka kala duwan ee aan taariikh ahaan la siinin adeegyada iyo dadka danyarta ah ee ku dhow garoonka diyaaradaha. Laga bilaabo 2020 ilaa 2024, Sanduuqa wuxuu bilaabay afar wareeg oo Barnaamijka Soo kabashada

La xiriir: Katherine Fountain
Fountain.k@portseattle.org
206.787.3071

Dhaqaalaha ah (oo hadda ah Fursadaha Dhaqaalaha ee Bulshooyinka) iyo Barnaamijka Deeqaha Deegaanka (oo hadda ah Barnaamijka Horumarinta Deegaanka), si loo maalgeliyo mashaariicda ay bulshadu hoggaamiso ee abuura waddooyin loo maro tababar iyo shaqooyin mushahar wanaagsan leh, iyo in la maalgeliyo horumarinta deegaanka. Tan iyo markii la aasaasay sanduuqaan, in ka badan 50 urur ayaa helay wadarta guud ee $9.25 milyan ah, taas oo maalgelisay in ka badan 80 mashruuc.

.

###

**Xog ku saabsan Port of Seattle**
*Waxaa la aasaasay 1911 waxaana lagu aasaasay cod dadweyne oo ah dowlad ujeedo gaar ah leh, Port of Seattle waxay higsaneysaa inay horumariso fursadaha dhaqaale iyo tayada nolosha gobolka iyadoo horumarineysa ganacsiga, safarka, ganacsiga, iyo abuurista shaqada si caddaalad ah, isla xisaabtan leh, iyo mas'uuliyad deegaan.*
*Dekadu waxay leedahay oo maamushaa Garoonka Diyaaradaha Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA), Terminaalka Kalluumeysatada — oo ah hoyga maraakiibta kalluumeysiga ee Waqooyiga Baasifigga — iyo maraakiibta dadweynaha. Dekadu waxay sidoo kale leedahay laba terminaal oo maraakiibta dalxiiska ah, terminaal badar qaabilsan, hanti ma-guurto ah, iyo terminaal xamuulka badda ah iyada oo loo marayo iskaashiga ay la leedahay Isbahaysiga Northwest Seaport.*

*Hawlgallada Port of Seattle waxay taageeraan ku dhawaad 205,000 oo shaqo iyo in ka badan $12 bilyan oo mushaar ah oo ka dhaca gobolka oo dhan. 12 Kii sano ee soo socda, Ajandaha Qarniga ee Dekada wuxuu doonayaa inuu abuuro 100,000 oo shaqo oo dheeraad ah iyada oo loo marayo kobaca dhaqaalaha, iyadoo noqonaysa dekedda ugu horreysa ee cagaaran iyo tamarta ku shaqaysa ee qaranka.. Xog badan ka baro* Webseedka Port.

---